



Kaalmada yar

looguna talogalay maal-gashiyada yar ee shirkadaha cusub ee la bilaabay



**REGION
DALARNA**

Waa maxay taageerada yar?

Mikro micnaheedu waa wax yar, kaalmada yar waa kaalmo dhaqaale (maaha amaah), taas oo shirkadaha yar iyo kuwa cusub ee la bilaabay ay codsan karaan markay u baahdaan inay sameeyaan maal-gashi yar.

Yaa codsan kara kaalmada yar?

Kaalmadan waxaa codsan kara adigaaga haysta shirkad ugu badnaan shan sano jirtay oo haysata ugu badnaan shan shaqaale ah. Tani waxay ahaan kartaa shirkad kuu ah shaqo kala bar ahaan, laakiin shirkadani waa in ay ku socotaa shuruudaha ganacsiga oo waa in adigu aad ka shaqaysaa shirkadan ugu yaraan wakhti kala bar ah. Hawshan waa khasab inay noqon karto mid faa'iido leh mustaqbalka oo abuurta fursado shaqo oo waaraya. Kaalmada yar waxaa laga codsan karaa gobolkan oo dhan oo waxaa la dhiiban karaa hal mar oo keliya calaa shirkad.

Kaalmo intee leeg ayuu qofku heli karaa?

Kaalmada yar waxaa lagu bixiyaa maal-gelinyaha u dhaxeeya 20 000– 60 000 karoon. Taageeradan waxay ahaan kartaa ugu badnaan boqolkiiba 50 ka mid ah maal-gelintan. Haddii aad samayso maal-gelin ah 60 000 karoon, markaasi waxaad heli kartaa ugu badnaan 30 000 karoon oo kaalmo ah. Samaynta maal-gelin ah 20 000 karoon, waxaad ku heli kartaa ugu badnaan 10 000 karoon oo kaalmo ah.





Tusaale ah waxa qofku ku codsan karo taageero

- Wax ka baddelka iyo haboonaysiinta goobaha iyo dhismayaasha
- Makiinadaha wax soo saarka
- Hantida nooceedu gaar u yahay hawshan
- Adeegyada talo-bixinta
- Kharashka loogu talagalay in markii ugu horeysay badeeco lagu soo bandhigo carwo ama bandhig.
- Suuq u samaynta shirkada marka ay tahay mid cusub oo la bilaabay.
- Xuquuq loo dhawray wax qof uu hindisay
- Ruqsadaha
- Cilmi baarista iyo horumarinta

Codso marka hore!

Adigu waa inaad soo dirtaa codsigaaga ka hor intaanad bilaabin maal-gelintaa. Alaabta iyo adeegyada la dalbaday ka hor intaan codsigan soo xaroon ma la oggolan karo.



Tusaale waxa qofku AANU ku heli karin tageero:

- Iibsiga gaadiid, dhul, dhismayaal, shirkad, hantida shirkad ku soo hartay ka dib markay khasaare gashay
- Maal-gashiyada loo baahanyahay in la sameeyo si hawshan u ahaato mid soconaysa, tusaale ahaan iibsiga makiinad cusub marka tii gabowday duugowdo
- Hantida loo isticmaali karo gaar ahaan, sida tusaale ahaan kombiyuutarada iyo telafoonada moobilka
- Kharashyada khuseeya shirkada socodsiinteeda caadiga ah, sida tusaale ahaan kirada, korontada, nadiifinta, mushaarooyinka (shaqaalaha)
- Shaqo gaar ah (mushahaaradaada)
- Kharashyada kiraysashada (Kiraysasho micnaheedu waa inaad kiraysato makiinad ama gaadiid muddo wakhti ah oo kharashka bishii yahay mid cayiman, taas oo baddel u ah in la iibsado)
- Lib ah in qayb-qayb lacagta loo bixiyo, tani waxay tahay in alaab lagu iibsado amaah

Wakhti intee leeg ayay qaadataa in la helo go'aanka?

Macluumaadka loo baahanyahay si go'aan loo qaato haddii ay dhanyihiin wax ay qaadataa qiyaastii 14 maalmood. Sidaas darteed aad u hubso inaad wax walba ku dartay. Fadlan soo hadal oo su'aalo dhiibo haddii aanad shaki kaaga jiro.

Goormaa la bixiyaa lacagtan?

Lacagtan waxaa la bixiyaa marka shirkadu ay caddayn karto in qaan-sheegashada la bixiyay iyo in kharashyadu waafaqsanyihiin waxa qofku ku codsaday taageeradan. Maadaama kaalmadan dib laga bixiyo waxaa khasab ah inaad caddayn karto in maal-gelintan lacagta ku baxaysa aad bixisay oo aad is dabari karto xilliga wakhtiga aad sugayso.

Sidee ayaan u codsanayaa?

Codsiyada waxaa lagu gudoomaa dhinaca intarnat-ka oo keliya, loona marayo www.minansokan.se

Lifaaqyada ay tahay in mar kastaba la soo raaciyo codsigan

Shirkada caddaynteeda diiwaan gelinta

Natiijada miisaaniyada (resultatbudget) iyo (likviditetsbudget).

Waa inaad caddayn kartaa sida aad uga fikirtay in shirkadani abuurto faa'iido iyo sida aad u qorshaysay in shirkadani u awoodo inay si joogto ah u bixiso lacagaha lagu leeyahay.

Hadii shirkadu laba sano wax ka yar jirtay waa inaad xitaa soo dirtaa qorshaha ganacsiga (affärsplan) kaas oo sharaxaya adeega ama badeecadaha aad iibin doonto, iyo sida aad u iibin doonto lacagta aad ku iibin karto.

Haddii shirkadu laba sano wax ka badan jirtay inaad xitaa soo dirtaa warbixinta xisaab xirka sanadlaha (årsredovisningarna) ee labadii sano ee ugu dambeeyay.

Haddii aad socodsiiso shaqo ay shuruud u tahay oggolaansho gaar ah waa inaad xitaa taasi ku soo lifaaqdaa.



Ma u baahantahay caawimaad

Ma u baahantahay caawimaad si loo helo aqoon dheeraad ah oo ku saabsan sida loo socodsiiyo shirkad, talo-bixinta dhinaca fikradaha ganacsi ama sida loo buuxiyo codsiga taageerada shirkad, waxaad geli kartaa Verksamta.se si loo helo warbixin dheeraad ah iyo in la helo talo-bixiye (rådgivare) jooga isla degmada aad ku nooqshahay.

Qorshe ganacsi oo sahlan kuna qoran Iswiidhish, Carabi iyo Ingiriisi waxaad ka helaysaa Almi Skåne: www.almi.se/Skane/Dokument/Enkel-affarsplan-pa-arabis-ka-och-engelska



Ma u baahantahay in lagaa caawiyo codsigaaga?

**Ama haysaa su'aalo khuseeya Taageerada
yar ama mid ka mid ah taageerooyinkayaga
kale ee shirkadaha waad nala soo xiriiri kartaa:**

Taageerada shirkadaha

Lars-Erik Liss
Annika Eriksson
Johan Domeij

E-post

larserik.liss@ltdalarna.se
annika.eriksson@ltdalarna.se
johan.domeij@ltdalarna.se

Telafoon

023-77 70 19
023-77 70 49
023-77 70 21

